



Xafiiska Wasiirka

Tixraac: SSC/WM/XW/XN003/2024

Taariikh: Noofeembar 1, 2024

XEER-NIDAAMIYAHA CASHUURTA GAADIIDKA,

Isagoo fulinaaya mid ka mid ah ujeeddooyinka lagu sheegay Qodobka 2(4) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, ee la xiriira dabagalka dakhliga;

Isagoo u hoggaansamaya mabda'a lagu sheegay Qodobka 3 (7) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, oo tilmaamaya in dhammaan dakhliga ka soo baxa ilaha lacagta caddaanka ah ee Dawladda & hay'adaheeda lagu shubo halka xisaab ee "Khasnadda Mideysan", laguna ilaaliyaa lacagtaas iyada oo la raacayo maareyn hufan oo waxku'ool ah;

Isagoo gudanaya awoodaha lagu siiyey Qodobka 9(1) ; ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, ee tilmaamaya in Wasiirku soo saari karo xeerhoosadyo, tilmaamayaal iyo hagayaal ka farcoma xeerka Maamulka Maaliyadda Guud.

Isagoo gudanaya awoodaha lagu siiyey Qodobka 88(1) ee Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, ee tilmaamaya inuu soo saarayo Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqangel& sharciyada dakhliga;

Markuu arkay Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, & Xeerka Tacrifadda Cashuuraha Berriga;

Wasiirka Maaliyadda wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyaha: **Cashuurta iyo Ajuurooyinka Gaadiidka.**

Qodobka 1aad
Cashuurta Gaadiidka

1. Cashuurta gaadiidka waxay waajib ku tahay gaadiid kasta oo jooga gudaha Maamulka SSC-Khaatumo.
2. Cashuurta gaadiidka waxaa hoos imaanaya dhammaan ajurooyinka, khidmadaha iyo cashuuraha la xidhiidha gaadiidka sida: khadmadda diiwaangelinta,

Qodobka 2aad
Ujeedada Xeerknidaamiyahan

1. Xeerknidaamiyahan wuxuu fasidoonaa xeerka cashuuraha berriga cutubka 4aad, qodobka 67aad, faqradiisa 1aad, oo qeexaysa gaadiidka la cashuurayo, berriga qodoba 68aad, faqradiisa 2aad, 3aad oo qeexaysa diiwaangelinta gaadiidka.

Qodobka 3aad
Baaxadda Xeerknidaamiyahan

2. Xeerknidaamiyahan waxa lagu maamuli doonaa dhammaan gaadiidka adeegsada waddooyinka soohdimaha Maamulka SSC-Khaatumo.

Qodobka 4aad
Gaadiidka ay ku Waajibeyso Cashuurta Wadda Maristu

1. Maamulka cashuurahu waxay diiwaangelinayaan gaadiid kasta marka la helo jiiwanka kastam kusoo cashuurey iyo buugga lahaanshaha.
2. Gaadiid kasta oo soo gala soohdinta SSC-Khaatumo waa in laga diiwaangeliyaa maamulka dakhliga, si waafagsan farqadda 1aad ee godobkan.

Qodobka 5aad
Gaadiidka leh Cashuur Dhaafka Joogtada a h

1. Gaadiidka laga dhaafayo cashuurta wadda marista waa:
 - a. Gaadiidka Dawladda.
 - b. Gaadiidka Safaaradaha/ama wakiillo dublamaasiyadeed,
 - c. Gaadiidka Qaramada Midoobey iyo hay' adaha calamiga ah.

- d. Gaadiidka isbitaallada caafimaadka, sida, ambalaasyada iyo gaadiidka maydka.
 - e. Gaadiidka gurmada iyo badbaadada, sida, ambalaasyada iyo dabdemiska.
 - f. Gaadiidka xeerku si kale u siiyey cashuur dhaafidda.
2. Gaadiidka leh cashuur dhaafka joogtada ah ee lagu sheegay farqadda 1-aad ee godobkan, haddii mulkiyaddu u wareegto cid ka basan kuwa leh cashuur dhaafka, gaadiidkaas waxaa ku waajibaya cashuurta kastamka ee marka hore laga dhaafay iyo cashuurta wada marista oo markaa uga bilaabanaysa.
3. Gaadiidka leh cashuur dhaafka joogta ah waa in ay sannad walba bilowgiisa yimaadaan xafiiska maamulka dakhliga, kana qaataan warqadda oggolaanshaha sannadlaha ah si loogu fududeeyo hawlaha.

Qodobka 6aad

Oggolaansho Fasax Ku Meelgaadh ah

1. Gaadiidka soo gala soohdimaha maamulka SSC-Khaatumo kana diwaan-gashan maamulka SSC-Khaatumo, joogayana wakhti go'an oo u leeyahay gof ama hay'ad, waxaa la siinayaa fasax wadda maris oo ku meel gaadh ah oo aan ka badnayn muddo saddex bilood ah, waxaana siinaya fasaxa maamulka dakhliga.
2. Gaadiidkaas waxa ku waajibaysa in ay bixiyaan cashuurta diiwaangelinta si waafaqsan godobka 1aad ee xeerknidaamiyan iyo cashuurta wadda marista ugu yaraan saddex (3) bilood ah.
3. Waqtiga u joogo gudaha Maamulka SSC-Khaatumo, waa in u haystaa waraagda oggolaanshaha wadda marista.
4. Marka mudadaas ay dhammaato waa in u gaadiidku bixiyaa dhammaan cashuuraha ku waajibay ama waa in uu ka baxaa soohdinta maamulka SSC-Khaatumo.

Qodobka 7aad

Wadashada Wargadda Caddeynta Bixinta Cashuurta.

1. Gaadiidka waxaa khasab ku ah inay mar walba wataan warqadda caddeynta cashuur bixinta oo ay ku caddahay gadarka lacageed ee laga qaaday muwaadinka cashuur bixiyaha iyo muddada loo cashuuray.
2. Tasmadda (Sticker) caddeynta, waa inay ku dhegsan tahay meel muugata oo gaariga banaankiisa ah sida muraayadda weyn ee gaariga oo aan ahayn nalalka korkooda ama meel la mid ah.
3. Waxaa mamnuuc ah inay socdaan baabuur an sidan warqadda iyo tasmadda caddeynta cashuur bixinta, marka laga reebo gaadiidka ku xusan godobka 5aad ee xeerknidaamiyahan.
4. Haddii ay ka lunto ama xumaato wargadda caddeynta bixinta cashuurta, mulkiiluhu wuxuu codsi sababaysan u gudbinayaa xafiiska maamulka dakhliga, si nuqul kale loogu sameeyo, waxaana u bixinayaa cashuurta moorka si waafaqsan godobka Tacrifadda Cashuuraha Berriga.

Qodobka 8aad

Habqaadista Cashuurta Jidmarka Gaadiidka

1. Cashuurta Jidmarka Gaadiidka waxaa loo qaadayaa saddex biloodle, lix biloodle ama sannadle, waxaana gaadaya xafiisyada u gaabilsan, waxayna bixinta cashuurta bilaamaysaa bilawga bisha janaayo ama bilawga 3 ama 6 billood walba bisha u horreysa.

Qodobka 9aad

Qiimaha La Cashuurayo Cashuurta Wadda Marista

1. Cashuurta wadda marista waxaa lagu cashuurayaa gimayaasha lagu caddeeyey shaxda 9.1 ee cashuurta wadda marista.
2. Cashuurta wadda marista waxaa lagu qimaynayaa quwadda gaadiidka (HP) ama culayskooda (TONS).

3. Gaadiidka waxaa si sannadle ah ugu waajibaysa cashuurta hubinta bed-gabka gaadiidka (kalaweeto), habraacyada lagu maamulayo bed-gaba gaadiidka waxaa soo saaraya hay'adaha ay khusayso, qiimaha lagu cashuurayo waxaa lagu caddeeyey Shaxda 10.3 ee cashuurta hubinta badgabka gaadiidka.

Qodobka 10aad

Kala Wareejinta Gaadiidka.

1. Cashuurta kala wareejinta gaadiidka waxay waajibaysaa markasta oo la lahaanshaha gaadhigu ka wareegayo qof kuna wareegayo qof kale.
2. Cashuurta kala-wareejinta waxa lagu bixiyaa: Foom- ka Cashuurta kalawareejinta oo ay ku lifaaqan yahay heshiishkii iibka notaayada ee sharciga ah.

Qodobka 11aad

Jaangoynta Ajuurooyinka iyo Cashuuraha Gaadiidka

1. Ujuurooyinka iyo khidmadaha lagu sheegay jaantusyada hoose ayaa noqon doona kuwo la dabaqayo marka uu dhaqan galo Xeer-nidaamiyahaan:

Shaxda Shaxda 10.1 Cashuurta Diiwaangelinta (Registration Fee)

Madax/Xige	Shaxda 10.1 Cashuurta Diiwaangelinta	Qiimaha (\$)
	Diiwaangelinta Gaadiidka Cusub (Baabuurta)	\$30
	Diiwaangelinta Gaadiidka Cusub (Mooto iyo Bajaaj)	\$15
	Diiwaangelinta Gaadiidka Cusub (Diyaaradaha)	\$150
	Diiwaangelinta Gaadiidka Ogolaansho Fasax ku meel gaadh ah (15 maalin)	\$15
	Diiwaangelinta Gaadiidka Ogolaansho Fasax ku meel gaadh ah (30 maalin)	\$30
	Diiwaangelinta Gaadiidka Ogolaansho Fasax ku meel gaadh ah 60 maalin)	\$60
	Diiwaangelinta Gaadiidka Ogolaansho Fasax ku meel gaadh ah (90 maalin)	\$90
	Cashuurta Kala Wareejinta Baabuurta	\$120

Shaxda 10.2 Khimadda Adeegga Taarkada Gaadiidka (Plate Number Fee)

Madax/Xige	Shaxda 10.2 Ajuurada Taarkada Baabuurta	Jaangooyn	Qiimaha (\$)
	Gaadiidka yaryar	14 HP	\$193
	Gaadiidka yaryar	18 HP	\$200
	Gaadiidka yaryar	21 HP	\$215
	Gaadiidka yaryar	24 HP	\$229
	Gaadiidka Xamuulka	1 TAN	\$184
	Gaadiidka Xamuulka	2 TANS	\$186

	Gaadiidka Xamuulka	3 TANS	\$191
	Gaadiidka Xamuulka	4 TANS	\$206
	Gaadiidka Xamuulka	6 TANS	\$220
	Gaadiidka Xamuulka	7-12 TANS	\$255
	Gaadiidka Xamuulka	13-24 TANS	\$260
	Gaadiidka Xamuulka	25-36 TANS	\$287
	Gaadiidka Xamuulka	37-70 TANS	\$298
	Gaadiidka Xamuulka	70-100 TANS	\$308
	Gaadiidka Xamuulka	BAJAAJ	\$100
	Gaadiidka Xamuulka	Motto	\$100
	Gaadiidka Xamuulka	UN	\$163

Shaxda 10.3 Khidmadda Buugta Gaadiidka (Circulation Book Fee)

Madax/Xige	Shaxda 10.3 Ajuurada Taarkada Baabuurta	Qiimaha (\$)
	Dib u daabicidda Taarko luntay	\$100
	Daabacaadda Buugga Gaadiidka (Circulation Book)	\$80
	Dib u Daabacaadda Buugga Gaadiidka (Circulation Book)	\$60

Shaxda 10.4 Khidmadda Liisanka Wadidda Gaadiidka (Driving Licent Fee)

Madax/Xige	Shaxda 10.4 Ajuurada Taarkada Baabuurta	Jaangooyo	Qiimaha (\$)
	Samaynta Liisanka Wadista Gaadiidka	Derejada 1aad	\$80
	Samaynta Liisanka Wadista Gaadiidka	Derejada 2aad	\$60
	Samaynta Liisanka Wadista Gaadiidka	Derejada 3aad	\$40

Shaxda 10.5 Cashuurta Badqabka Gaadiidka (Traffic Safety Tax)

Madax/Xige	Shaxda 10.5 Cashuurta Badqabka Gaadiidka (Kala-weto)	Qiimaha (\$)
	Cashuurta Badqabka Baabuurta	\$20
	Cashuurta Badqabka Bajaaj/Motto	\$10

Shaxda 10.6 Cashuurta Jidmarka (Road Tax)

Shaxda 10.7 Cashuurta Waddo Marista (6 Biloodka)					
Nooca Gaadiidka	Xoogga (HP & TON)	TR (114526)	S/T (116103)	AD/T (142261)	TOTAL (USD)
Bajaaj	-----	\$10	\$3	\$2	\$15
Mootto	-----	\$10	\$3	\$2	\$15
Nooho(Noah)	14HP	\$30	\$3	\$2	\$35
Baarabokos(Probox)		\$30	\$3	\$2	\$35
Raam(Ram)		\$30	\$3	\$2	\$35
Indho-cad		\$30	\$3	\$2	\$35
Granda		\$30	\$3	\$2	\$35
Maarked(Mark II)		\$30	\$3	\$2	\$35
Fitis(Vitz)		\$30	\$3	\$2	\$35
Gadiidka Yar yar		\$30	\$3	\$2	\$35
1ten(Tayota 1-10)		\$30	\$3	\$2	\$35
Feroosa(Verrozza)		\$30	\$3	\$2	\$35
(buses 10-21 seat)	18HP	\$40	\$3	\$2	\$45
Suzuki 4wd		\$40	\$3	\$2	\$45
Kuruukar (Tayota kurlker)		\$40	\$3	\$2	\$45
Tatyta Harrier		\$40	\$3	\$2	\$45
Xaajiyad(Hilux)	21 HP	\$50	\$3	\$2	\$55
Seeraf (Tayota surf)		\$50	\$3	\$2	\$55
Pajero 2 seat		\$50	\$3	\$2	\$55
Datzun		\$50	\$3	\$2	\$55

IWM		\$50	\$3	\$2	\$55
Landcrusers	24HP	\$60	\$3	\$2	\$65
Xaabsade	1 TON	\$30	\$3	\$2	\$35
Dhayne 2 seat		\$30	\$3	\$2	\$35
IWM		\$30	\$3	\$2	\$35
Dhayne 4seat	2 TON	\$40	\$3	\$2	\$45
Niic		\$40	\$3	\$2	\$45
Booyad Niic		\$40	\$3	\$2	\$45
Iwm		\$40	\$3	\$2	\$45
Iskarogo	3TON	\$50	\$3	\$2	\$55
Boyad 30		\$50	\$3	\$2	\$55
IWM		\$50	\$3	\$2	\$55
Waraad	5-6 TON	\$90	\$3	\$2	\$95
iwm		\$90	\$3	\$2	\$95
Gaadiidak xamuulka(8 boole)	7-12 TON	\$130	\$3	\$2	\$135
Gaadiidak xamuulka (Candho-mayd)		\$130	\$3	\$2	\$135
Gaadiidak xamuulka (jayniis)	13-24 TON	\$140	\$3	\$2	\$145
Gaadiidak xamuulka (remoodh)		\$140	\$3	\$2	\$145
Gaadiidak xamuulka waawayn	25-36 TON	\$190	\$3	\$2	\$195
Gaadiidak xamuulka waawayn	36-70 TON	\$200	\$10	\$5	\$215

Shaxda 10.8 Cashuurta Dakhliga Gaadiidka Xamuulka (Road Used Tax)

Madax/Xige	Shaxda 10.7 Cashuurta Dakhliga Gaadiidka Xamuulka	Halbeeg	Qiimaha (\$)
	Samtareele (Badeeco)	13-37 ton	\$60
	Candhamaydle (Badeeco)	8-12 ton	\$45
	Sideed Boole (Badeeco)	6-8 ton	\$35
	Waraad (Badeeco)	3-4 ton	\$30
	Dayne (Badeeco)	1-2 ton	\$10
	Waarad Booyad (Shidaal)	4 ton	\$40
	8 Boole Booyad (Shidaal)	6-8 ton	\$50
	Candhamaydle Booyad (Shidaal)	9-12 ton	\$60
	Santareele Booyad (Shidaal)	13-37 ton	\$70

Shaxda 10.9 Ganaaxyada Booliska Ilaalada Waddooyinka (Traffic Police)

Madax/Xige	Shaxda 15.1 Ganaaxyada Booliska Ilaalada Waddooyinka (Traffic Police)	Qiimaha (\$)	Digniin
	In gaadiidka si siman laysku dhinac dhigto iyadda oo la wada sheekaysanyo ama wax laysku gudbinayo wuxu muteysan ganaax.	\$10	Digniin
	Qofkii ku xadgudba askariga haad-bixinaya ma calamadaha sama faraha, wuxu muteysan ganaax.	\$20	Digniin
	Gaadiidka rar Gudub so rarta ama rar geesaha gariga uga baxsan ama gadal ka baxsan wuxu muteysan ganaax	\$20	Rar kadhigid
	Gaadiidki qadaa rar ama rakab kabadan inti logu talla galay wuxu muteysan ganaax.	\$20	Rar kadhigid
	Gaadiidka aan magaca Mulkiilaha lahaa ku qornayn wuxu muteysan ganaax.	\$5	Digniin
	Gaadiidka aan lahayn farinka bareega nooc kasta uu yahay laba,sadex iyo afar lugayda wuxu muteysan ganaax.	\$50	Waddo kajoojin

	Gaadiidka uusan shaqaynayn nalalka horay iyo gadaal nooc walba ay yihiin wuxuu mutaysan Ganaax	\$20	Waddo kajoojin
	Qiiqa uuradda wadata ee iskamitada ay keentay cilad ama dayac ka jira Matoorka gaariga.	\$20	Digniin
	Gaariga aan wadan Buuga lahaanshaha gaariga.	\$10	Hubin
	Gaadiidka aan lahayn Taarkadda midka hore ama gadaal waxaa uu mutaysanyaa Ganaax.	\$10	Digniin iyo Taarko xidhid
	Darawalka aan lahayn ruqsada wadida (Driver Licence) gaariga wuxuu mutaysanyaa Ganaax dhan.	\$10	Digniin
	Dawaralka laysankiisu dhacsanyahay wuxuu mutaysanyaa Ganaax dhan.	\$5	Digniin
	Darawalka kasoo taga laysinka wuxuu mutaysanyaa Ganaax dhan.	\$5	Digniin
	Taxadar laanta loo socdo, iyadda oo la ilaalinayn badqabka hantida iyo nafta gudaha ama banaanka Magaalooyinka waxaa lagu ganaaxayaa.	\$10	Digniin
	Xawaare Saa'id ah oo lagu socdo bundooyinka korkooda ama lagu dul istaajiyo baabaarta, ama laysku dhafo (Overtake) waxaa lagu ganaaxayaa.	\$30	Digniin
	Xawaaraha Magaaladda gudaheeda in uusan ka badnan 30km/h, Goobaha waxbarashadda 20KM/h waxaa lagu ganaaxayaa.	\$10	Digniin
	Gaadiidka ciidamadu ama Dowladda ee lahayn Taarkadadda horay ama gadaal waxaa lagu ganaaxayaa.		Digniin loo diro hay'adda ama taliska uu ka tirsanyah.

Qodobka 12aad

Bixin La'aanta Cashuurta Wadda Marista

1. Baabuurta ku guuldaraysta in ay cashuurta ku bixiyaan waqtiyada loo cayimay waxaa laga qaadi doona tallaabooyinka soo socda; -
 - a. In ciidanka booliska ilaaladda cashuuraha iyo ciidanka booliska ilaaladda waddooyinka ay baabuurka ka joojiyaan isticmaalka waddooyinka ayna xareeyaan ilaa inta uu ka bixinayo cashuurta, waxaana laga gaadayaa ganaaxyadda ku xusan Tacriifadda Cashuuraha Berriga.
 - b. Baabuurta lagu xareeyey goobaha ciidanka ilaaladda cashuuraha habeen kasta oo ay ku dhaxaan waxaa laga qaadayaa ganaaxyadda ku xusan Tacriifadda Cashuuraha Berriga.

Qodobka 13aad

Baabuurta Fadhida ee Aan Shageynayn

1. Waa inuu gaari walba oo laga safrayo ama hawl kale u farista sida cillad ku timaada gaariga la keeno ogaystintiisa xafiiska maamulka dakhliga. Taasoo lagu caddayno kilometers (KM) gaariga meesha uu marayo iyo sababta uu u fartistay, waxaana laga soo saarayaa habraac ugaara oo arrinta gaadiidka fadhiistey.

Qodobka 14aad

Bixinta iyo Ururinta Ajuurooyinka iyo Khidmaddaha

1. Ajuuradda iyo Khidmadda waxaa uruurinaya shaqaalaha/saraakiisha Wasaaradda Maaliyada ee loo idmay ee ku sugan Waaxda Cashuuraha Berriga, Wasaaradda Hawlaha Guud iyo degmooyinka.
2. Dhammaan shaqsiyaadka bixinaya ajuurooyinka iyo khidmaddaha waxaa la farayaa in ay ku shubaan lacagahaas akoonada Wasaaradda Maaliyaddu u cayintey dakhliga ajuurooyinka iyo cashuuraha gaadiidka.

Qodobka 15aad

Warbixinta Korjoogtenta Dhaqangalka Xeer-nidaamiyaha

1. Waaxda Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda waa inay korjoogteysaa u hoggaansanaanta Xeer-nidaamiyahaan iyo xeerarka laga dheegtey, oo ay soo saartaa warbixin bille ah, mid lix bilood ah oo ay la wadaageeyso Wasiirka Maaliyadda.

Qodobka 16aad

Wareegtooyin

1. Wasiirka Wasaaraddu wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro, wareegtooyin, hageyaal iyo tilmaamo lagu saxayo, laguna toosinayo Xeer-nidaamiyahan oo aan ka hor-imaanayn qodoboda xeerka Cashuuraha Berrig iyo Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 17aad

Dhaqangelinta Xeer-nidaamiyahaan

1. Xeer-nidaamiyaha Cashuuraha iyo Ajuurooyinka Gaadiidka waxa uu dhaqangelayaa taariikhda uu saxiixo Wasiirka Maaliyadda.
2. Nuqullada Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu faafinaya mareegta (website) Wasaaradda Maaliyadda iyo midda Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.

Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiirad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Hawlaha Guud ee SSC Khaatumo

Saxeex: 

